# Warbixin ku saabsan xarigga iyo xabsiga

Buuggan waxad ka akhrisan kartaa waxyaabo ku saabsan sharciyada muhimka ah, ee ku wajahan kuheynta qof xabsi. Haddii aad rabto inaad waxbadan ogaato, waxad ka amaahsan kartaa qawaaniinta iyo sharciyada shaqaalaha meesha. Waxad mar walba weydiin kartaa shaqaalaha, haddii ay jiraan wax, aad ka shakisan tahay.

KRIMINAL FORSORGEN

2025

# Xarigga

**1. Soo hor keenid qaali (dhegeysiga qofka 24 saacadood gudahood xarigga kadib)**
Waa lagu xiray. Haddii aan lagu sii deyn 24saacadood gudahood, waa in lagu hor keenaa qaali. Qaaligu ama waa ku deynayaa, kugu xukumayaa, in xarigga uu sii jiro ilaa 3 jeer 24saacadood, ama uu go´aamiyo in lagu xabbiso ilaa wakhti.

**2. Qareen/difaace**
Booliska ayaa kaa talo siinaya adiga wixi ku saabsan helitaankaaga inaad hesho qareen. Arrinta la xiriirta dhageysiga afar iyo labaatan saacadadod kadib waa in laguu magacaabaa ama laguu qabtaa adiga difaace/ qareen.

**3. xarigu waa la sii wadaa**
Haddii qaaligu uu gooyo, in xarrigu sii socdo, waa in mar kale lagu hor-keenaa maxkamadda, ugu dambeyn 3 jeer oo 24saacadood ah kadib marka dhageysiga afar iyo labaatanka saacadoodka hore uu dhammaado. Qaaliga ayaa goynaya, in ama lagu deeyo ama lagu xabbiso.

**4. Go´doomin**
Booliska waa go´aamin karaa, in lagaa go´doomiyo maxaabiista kale, inta aad xiran tahay, iyo inaanad la xiriirin dadka kale.

**5. Ajaanibta**
Booliska ayaa kaa talo siinaya wixi ku saabsan xuquuqdaada si aad ula xiriirto arrinta ku saabsan safaaradda dalkaaga ama qunsulka.

Shaqaaluhu waxa ay kugu yeeri karaan turjubaan, haddii ay muhim noqoto iyo suurtogal.

**6. Booliska**
Booliska ayaa kuu sheegi kara wixi ku saabsan sharciyada khuseeya xarrigga. Shaqaalaha ayaa kaa caawinaya inaad la xiriirto booliska, haddii aad dooneyso.

# Xabsiga (xabsi wakhti kooban)

**7. Difaacaha**
Iyadoo lala xiriirsiinayo dhageysiga qofka 24saacadood xarrigga kadib waxa laguu qabanayaa ama sameynayaa qareen ku difaaca. Waxa fursad laguu siinayaa inaad la hadasho qareenkaaga ku difaacaya, ka hor inta aan kiiskaaga lagu dhageysan maxkamadda gudaheeda.

**8. Wakhtiga ugu dambeeya xarigga**
Haddii lagu xiro xarrigga xabbisiga, waxa uu qaaligu goynayaa wakhti kama dambeys ah, oo ku saabsan goorta maxkamaddu ka shaqeyneyso xabsigaaga mar kale. Wakhtiga kama dambeystu waa inuu noqdaa ugu dameyn 4 todobaad. Uma baahnid sida caadiga ah inaad joogtid maxkamadda, marka qaaligu go´aaminayo, in xariggaaga uu sii socdo iyo in kale.
Qaaligu waa kugu xiri karaa, inaad joogto.

**9. Go´doon**
Qaaligu wuu go´aamin karaa, in lagaa go´doomiyo maxaabiista kale. Haddii lagu go´doomiyo go´aankaa maxkamaddu goysay kadib, waxa aad tusaale fursad u heystataa ilaa xad in lagu booqdo. Ka fiiri hoos qeybta kontoroolka booqasho iyo waraaqaha.

**10. Racfaan**
Waad keeni kartaa maxkamadda sare go´aanka qaaliga ee ku saabsan xarriga xabbisidda iyo go´doominta. Waxa loogu yeeraa racfaan ka qaadasho go´aanka. Qareenkaaga ayaa kala talinaya wixi ku saabsan arrinkaa.

**11. Kontoroolka booqasho iyo waraaqaha**
Booliska wey go´aamin karaa, inaan lagu soo booqan, ama in dadka ku soo booqanaya la kontoroolo. Waxa aad shardi ka dhigi kartaa in go´aanka la keeno maxkamadda. Boolisku xittaa waxey go´aamin karaan, in waraaqahaaga qasab laga dhigo in la kontoroolo. Haddii boolisku ay heystaan waraaqahaaga, waa in sida dhakhsa ah loo keenaa maxkamadda.

Waxad u leedahay xaq inaan laguugu kontoroolin iyo inaad waraaqo is-dhaafsataan qareenka laguu qabtay. Waxad sidoo kale xaq u leedahay inaan laguugu kontoroolin waraaqaha aad is-dhaafsaneysaan maxkamadda, wasiirka caddaaladda, Agaasinka maamulka xabsiyada iyo maxaabiista iyo nidaam ilaaliyaha baarlamanka. Waraaq is-dhaafsiga kaala dhexeeya qaar ka mid ah maamulada dowliga ah waxa looga baahan yahay sharciyo khaas ah. Weydi shaqaalha wixi ku saabsan arrinkaa.

Jeelku waxa uu xitaa go´aamin karaa, in waraaqahaaga iyo dadka ku soo booqanaya la kontoroollo, tusaale si loo joojiyo in gudaha wax laga soo geliyo iyo in dibedda waxa laga soo geliyo. Hoos ka fiiri sharciyada, amarada, iyo mamnuuca.

**12. Ku hadalka taleefanka**
Sida caadiga ah fursad uma heysatid inaad taleefon ku hadasho. Dhacdooyinka qaar waxad weli heleysaa ogolaansho aad taleefon ku hadasho, tusaale haddiiwaraaqda qoran qaadanayso muddo aad u dheer xaaladdaada. Oggolaanshahani wuxuu ku xiran yahay suurtogalnimada iyo bal haddii bilayska ama xabsiga deegaanku diido. Haddaad rabto inaad wacdo garyaqaankaaga, sidii caadiga ahayd waa laguu oggolaan doonaa sidaas..

Ciqaab bey keenaa in taleefon moobiil lagu dhex heysto jeelka. Xitaa waxa ay keentaa ciqaab haddii saaxibadaa ama reerkaaga ay heystaan, marka ay adiga kugu soo booqanayaan jeelka.

**13. Ajaanibta**
Boliiska ayaa kaala talinayaan wixi ku saabsan xuquuqdaada ah inaad ugu tagto arrimo la xiriira safaaradda dalkaaga ama qunsulka.

Shaqaaluhu waa u yeeri karaan turjubaan, haddii taasi muhim noqoto iyo suurto gal in la sameyn karo.

**14. Qaanunada , amarada, iyo mamnuuca**
Waxa aad xaq u leedahay inaad aragto, waxa ku qoran qawaaniinta maamulka xabsiyada iyo maxaabiista iyo shuruucda xabsiyada ee Yurub, oo ay la jirto waxyaabaha xabsigan ama jeelkan sharciyo isaga u khaaska ah.

Aalkolada iyo mukhaadaraadku waa mamnuuc. Waxa iyadana la mid ah daawada, uusan qorin dhakhtar.

Waxa ay keentaa ciqaab in laga baxsado xabsiga.

Intaa kadib waa inaad u hogaansanaataa sharciyada jira iyo amarada shaqaalaha iyo waxyaabaha ay kaa mamnuucaan. Qaanuunadu waxa ay ku qoran yihiin buuga nidaamka jeelka. Halkaas waxa aad xitaa ka akhrisan kartaa wixi ku saabsan waxyaabaha la sameeyo tusaale aaditaanka meelaha laga soo iibsado waxyaabaha muhimka ah, wakhtiyada booqashada iyo soo celinta walxaha la leeyahay. Halka hoose waxa aad ka akhrisan kartaa wixi ku saabsan qaanuunada ugu muhiimsan ee daganaanshaha.

**15. Caawimaadda shakhsiyadeed iyo bulsho**
Maamulka xabsiyada iyo maxaabiista waa inuu kaa caawiyaa inuu xaddido khasaarooyinka xagga shaqada, arrimaha bulshada iyo shakhsiyanba, dhibaatooyikaas oo imaan kara marka lagu xiro ama lagu xabbiso.

Waxa ku soo booqanaya lataliye/la taliso, ku siin kara talo iyadoo wadashaqeyn lala yeelanayo shaqaalaha maalin walba ee xabsiga. Waxa aad kala hadli kartaa shaqaalaha maalin walba ka shaqeeya xabsiga ama la taliso/la taliye wixi ku saabsan dhibaatooyinkaaga shakhsiyadeed ama dhibaatooyinka qoyskaaga ee shakhsiyeed.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad kale oo khaas ah, waxad la xiriiri kartaa macallin, baadari, kalkaaliye/kalkaaliso, dhakhtar ama kuwo kale.  Weydi shaqaalaha wixi dheeraad ah.

**16. Raashin iyo cabitaan**
Jeelka ayaa kugu deeqaya raashin iyo cabitaan. Sababo caafimaad aawadood dhakhtarku waa kuu qori karaa raashin khaas ah. Haddii aad tahay khudrad ku nool/qof aan hilib cunin ama sabab diineed aawadeed aad u baahan tahay raashin khaas ah, waa laguu raacayaa shardiyadan marka raashinka laguugu deeqayo. Weydi shaqaalaha qeybta amaba baadariga.

Adigoo u maraya jeelka waxa aad gadan kartaa badeecada la isticmaalo ee caadiga ah; tusaale jara´ido, tubaako, iyo raashin. Kala hadal shaqaalaha wixi arrinkaa ku saabsan.

Eheladaada ama dadka kale waa inaaney adiga kuu keenini badeecadaha la isticmaalo.

**17. Sigaarka**
Sigaarka waa ka mamnuuc gudaha dhammaan hay'adaha hoos yimaada adeega xabsiga iyo carbinta. Waxaa loo ogol yahay dibada. Qabanqaabada sigaarka way ku kala duwan yihiin  hay'adaha.

Tubaakada, sigaarka iyo waxyaabo kale oo sigaarka la xiriira-waxa caadi ahaan lagu hayn doona armaajo ka baxsan qolkaaga ama shaqaalaha ayaa hayn. Armaajadu waa in had iyo jeer ay qufulan tahay, haddii aad adigu leedahay, oo adiga baa haysan doontaa furaha.

Lama ogola inaad tubaako ama waxyaabo kale oo sigaar la xiriira qolkaaga aad ku haysato. Hadii aad xadgudub ku samaysid mid ka mid ah xeerarka ayaa ku mutaysan doontaa ciqaab edbin ah.

Haddii aad rabto in aad joojiso sigaarka, weydii shaqaalaha in aad ku biiri kartid barnaamijka joojinta sigaarka.

**18. Musqul/suuli**
Waxa aad sida caadiga ah fursad u heysataa inaad qubeysato maalin walba. Alaabada qubeyska waxa aad ka heleysaa shaqaalaha, ama waxa aad ka iibsan kartaa jeelka.

**19. Alaabada iyo lacagaha**
Waxa jira sharciyo ku saabsan, alaabada lagu siinayo xilliga degenaanshahaaga. Waxa si si elektaroonik ah lagaaga soo diri karaa lacag dibedda oo aad ku isticmaali kartaa jeelka. Waxaase jira sharciyo ku saabsan, ilaa intee in la eg oo kaash ah iyo ilaa intee lacag dhan bey tahay inaad heysato. Haddii xabsigu ku shaqeeyo nidaam bilaa kaash ah, lama oggola inaad haysato lacag kaash ah haba yaraatee. Shaqaalaha ayaa kuu sheegaya wixi ku saabsan, hadba sharcigi shaqeeya marka laga hadlalyo inaad alaabadaada iyo lacagtaada ku dhex heysato jeelka.

Waa inaadan ku dhex heysanin taleefon moobiil ah jeelka. Ka akhri wixi dheeraad ah qeybta wadahadalka taleefonada.

**20. Booqasho**
Waxa aad sida caadiga furad u heysataa in lagu soo booqdo. Boliiska wey diidi karaan booqasho ama waa go ´aamin karaan, in booqashada la kontoroolo, fiiri qoraalka ka hooseeya qeybta kontorool booqasho iyo waraaqo.

Haddii boolisku ay kuu diideen in lagu soo booqdo ama ay kugu xireen shardi kontorool, waxa jira sharciyadan soo socda:

Waxa aad xaq u leedahay in lagu soo booqdo, hadba inta xaaladda jeelku ogoshahay. Saacadda booqashadu waa in aaney ka yaraan 1/2. Booqashadu inta badan waa mid aan la kontoroolin. Jeelku waa go´aamin karaa, in booqashada la kontoroolo, haddii ay muhim noqoto, tusaale si looga hortago in wax lagu soo qariyo ama xaalad ciqaabeed kale. Jeelku xitaa dhacdooyinka qaar waxa uu mamnuuci karaa booqashada qofki isagu uu doono.

Haddii aadan laheyn qoys ama saaxiibo, ku soo booqan kara, waxa aad weydiisan kartaa shaqaalaha bal iney jirto fursadda ah inaad hesho saaxib booqasho.

Haddi maxkamaddu go´aamisay, in aad ahaato mid la go´doomiyey, waa inaad sida suurto galka ah heshaa booqasho hal mar todobaadkiiba. Saacadda booqashadu waa in aaney ka yaraan 1 saac.

Waa ku soo booqan karaan jaraa´idadu, marka laga reebo booliska oo is-hortaaga mooyaane iyadoo taa loo tixgelinayo ulajeedada xabbisidda. Haddii lagu wareysanayo, waa in marka hore aad ka haysataa ogolaansho maamulka xabsiyada iyo maxaabiista, maadaama ay jiraan xuduudo ka yaala waxaad u sheegayso warbaahinta.

Waxa aad mar walba xaq u leedahay in booqashada qareenkaaga aan la kontoroolin.

**21. Waraaqaha**
Waraaqaha, aaney kontoroolin boolisku, waxa kontoroolaya jeelka si uu u hubiyo, inaan loo isticmaalin in wax loo soo dhexgeliyo xabsiga ama wax loo sii dhexgeliyo dibedda. Sidaas darteed waraaqaha, aad hesho, waa lafuraa, adioo arkaaya. Waraaqaha, aad adigu dirto, waxa loo dhiibaa shaqaalaha iyagoo furan. Waraaqaha, aad adigu direyso, waa in loo geeyaa shaqaalaha iyagoo furan. Kadib marka la kontoroolo waa la xirayaa, adigoo arkaya. Waraaqaha waxa kaliya akhriyo shaqaalaha haddii looga maarmi waayo sababo badbaado ama ammaan.

**22. Post Digital - mail ka masuuliyiinta dawladda**
Maxaabiista badankoodu ma laha fursad ay ku galaan shabakadda internetka oo sidaas daraaddeed ma eegi karaan Boostada dijitaalka ah / email. Haddii aanad haysan internet waa lagaa joojin karaa Boostada dijitalka / email-ka. Waxaad ku heli doontaa waraaqaha lagaaga soo diro boostada caadiga ah cinwaankaaga diiwaangashan, ilaa aad bixiso cinwaan kale mooyee. Waxa kale oo aad dooran kartaa in qof qaraabadaada ka mid ah qoraalada ooga wakiilatid, si uu isagu / iyadu Boostada dijitaalka kaaga wargeliyo. Weydii shaqaalaha wixii macluumaad dheeraad ah.

**23. Bixitaan**
Bixitaan waxa la ogolaadaa kaliya mar-mar aad u yar iyo kaliya ulajeedo khaas ah, sida tusaale qof xigto ah oo aad u xanuunsanya/aad u jiran ama duug/aas dhimasho kadib. Bixitaan waxa lagu dhiibaa oo kaliya ogolaanshaha booliska, waxana uu ku dhacaa qaab lagu raacayo/ilaalinayo.

**24. Wadajir**
Inkastoo boliiska ama maxkamadda aaney go´aansan, in lagu go´doomiyo, ayaa haddana xaaladda jeelka aawadeed mar-mar ay suurto gal noqon kartaa in lagaa xaddido lajoogitaanka ama wadajirka maxaabiista kale.

Waxaa jira qawaaniin khaas ah oo ku saabsan wadajirka, haddii aad tahay qof ka yar 18 sano. Weydi shaqaalaha wixi dheeraad ah.

**25. Ku wareejin xabsi kale**
Waxa dhacdooyinka qaar suurtogal ah in laguu raro xabsi kale, ka hor inta aanu kuugu dhicinba xukun (sharciga maxkamadda §777). Weydi wixi dheeraad ah qareenkaaga.

**26. Shaqo**
Ka maxbuus ahaan adiga ku jirta jeelka waxa aad xaq u leedahay in laguugu howgeliyo shaqo, waxbarasho ama howlo la aqoonsan yahay, oo ay hoos timaado daweyn. Haddii shaqo laguu diro, waxa aad heleysaa oo lagu siinayaa lacagta shaqada. Haddii aad xanuunsato, waxa lagu siinayaa lacagta jirada.

Adiga xitaa waa la iman kartaa shaqo, laga qabto gudaha xabsiga, laakin shaqada waa in si kastaba ha noqotee uu ogolaadaa maamulka xabsiga waana in ay waafaqsanaataa sharciga, nidaamka iyo nabadgelyada xabsiga. 15% mushaharkaaga ama mushaharka markaad xanuusan tahay waa la dhigi doonaa waxaana loo isticmaali karaa kharashka la xiriira bixidda ama sii-daynta.

**27. Waxbarasho**
Jeelku waxa uu ku deeqaa waxbarasho. Kala hadal shaqaalaha wixi ku saabsan fursadaha. Haddii aad xiiseyneyso in aad dejisato qorshe dheer oo waxbarasho wakhti dheer qaadaneysa inta aad xabsiga ku jirto, waa inaad kala hadashaa shaqaalaha wixi arrinkaa ku saabsan. Waxa lagu siinayaa lacagta shaqada, marka aad qaadaneyso waxbarasho.

**28. Waqtiga xorta**
Waxa aad sida caadiga ah xaq u leedahay in ugu yaraan hal saac hawada laguu bixiyo maalinwalba ("soc-socod"). Fiiri nidaamka guriga.

Dhallinyarada ka yar 18 jir waxay xaq u leeyihiin laba saacadood oo jimicsi ah maalintii, oo mid ahaan dibadda loo saarayo.

Jeelku waxa uu leeyahay waxoogaa howlo/dhaqdhaqaaq ah, tusaale miiska teeniska, iskaak/shax/jar iyo tababarka jirak. Weydi shaqaalaha wixi dheeraad ah iyo fursadaha.

Waxad u heysataa fursad inaad dhageysato raadiyo, fiirsato taleefishin, akhrisatana jaraa´ido joornaalo iyo buugaag. Boolisku mar mar dhif ah waa kaa mamnuuci karaan. Weydi, shaqaalaha bal in ay jiraan fursado aad ku kireysan karto raadiyo iyo taleefishin iyo fursado aad ku amaahsan karto ama iibsan karto jaraa´ido, joornaalo, iwm.

Haddii maxkamaddu go´aamisay, in lagu go´doomiyo, waxa aad fursad u heysataa inaad hesho taleefishin lacag la´aan ah.

**29. Doorasho iwm.**
Waxad xaq u leedahay inaad ku codeyso waraaq doorashada baarlamanka ama doorashada degmada haddaad buuxiso shuruudaha qaar, tusaale ahaan inaad tahay muwaadin Danish ah. Sidoo kale xaq baad u leedahay inaad ka qeyb qaadato qaab kale oo sharci ah, howl siyaasadeed.

**30. Jirro ama Xanuun**
Waxa jira dhakhtar xabsigu/jeelku leeyahay. Waxa laguugu deeqayaa wadahadal aad la yeelaneyso dhakhtarka ama kalkaaliso/kalkaaliye. Haddii intaa kadib ay kula tahay, inaad u baahan tahay dhakhtar, waa inaad u sheegtaa shaqaalaha, oo u sii gudbinaya dhakhtarka/kalkaalisada ama kalkaaliyaha.

Dhakhtarka ayaa qiimeynaya, in lagu daweynayo iyo in kale, iyo bal in daweyntu ka dhaceyso gudaha mid ka mid jeelalka maamulka xabsiyada iyo maxaabiista ama cusbitaal caadi ah.

**31. Daweynta ilkaha**
Waxa aad xaq u leedahay daweynta lagama maarmaanka, taas oo ka dhigan daweyn ilkaha oo deg-degga ah(xanuunada ilkaha ee sida deg-degga ah u dhaca). Waxa dhacda mararka qaar in ay tahay inaad iska bixiso adigu kharashka. Weydi shaqaalaha wixi ku saabsan arrinkaa.

**32. Magdhaw ku saabsan shilalka**
Waxaad xaq u leedahay magdhaw haddii aad ku dhaawacanto xukunkaaga jeelka. Waxaad dalban kartaa magdhow la xiriira shilalka ka dhaca, goobta shaqada iyo sidoo kale shilal dhaca inta lagu jiro xilliga firaaqada aad tahay. Sidoo kale waxaad heli kartaa magdhow hadii ay muraayadaha indhaha kaaga jabaan shil awgiisa.

**33. Maareynta Kiiska**
Caadi ahaan waxaad xaq u leedahay in aad ka hadashid kiiskaaga inta aan la gabogabayn ka hor. Sida caadiga ah diidmooyinka iyo go'aamada lagugu soo rogaayo oo dhan waa in la taaban karo oo sabab leh yihiin. Waxaad xaq u leedahay in aad hesho go'aan qoraal ah. Sida badan waxaad xaq u leedahay inaad aragto dokumentiyada kiiskaaga oo aad ka hadashid kahor intaan go'aan la gaarin.

Sharciyada qaaska ah waxaa loogu talo galay kiisaska rumaanka ah, laga saaro ururka iyo kala wareegida u dhexeeysa hay'adaha xabsiga deenishka iyo adeegga carbinta. xaaladaha noocaas ah xaq uma lihid inaad hesho dokumennti, oo sidaas daraaddeed waxaad kaloo xaq u lahayn in laguu sharraxo sababaha go'aanka, iyo waxyaalo kale.

**34. Dacwooyin**
*Cabashooyinka ku saabsan go'aanada ay gaaraan adeegga deenishka ee xabsiga iyo carbinta*
Sida caadiga ah sharci ahaan kama dacwoon kartid go´aamada ay gaaraan adeegga denishka waaxa xabsiyada iyo carbinta. Laakiin, waxaa suurtagal ah inaad ka cabato go'aamada la xiriira:

- Bixida
- Booqashooyinka, oo ay ku jiraan diidmooyinka codsiyada ilmahaaga kula joogo
- Baaritaanka shakhsi ee maxbuuska
- Qolka dishibiliinka, qorlka wareysiga iyo xannibaadda bixidda
- Meelaynta qolka difaaca, isticmaalka jeebbo iyo tallaabooyin kale oo loogu talo galay ka hortag
- Isticmaalka xoog
- Isu geeynta maxaabiista
- Xad u yeelida xaqa aad u leedahay inaad la xiriirto warbaahinta

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan fursadaha dacwooyinka aad ee falka xabsiga kaga dacwoon kartid, hadii noqoto falal ku saabsan arimaha xabsiga iyo arimaha shaqsiga. Shaqaaluhu waxay kaa caawin kartaa inaad hesho dokumentiyada saxda ah.

Haddii aad xaq u leedahay inaad ka cabato go'aanka, shaqaalaha baa warkaasi kuu sheegi doonaa. Hadii ay go'aamada yihiin kuwa qoraal ah, fursadaha dacwadaha waxaad ka arki kartaa go'aanka qoran.

Haddii aad rabto inaad u dacwooto Agaasinaka maamulka xabsiyada iyo maxaabiista, waa inaad sameysaa dacwada 2 bilood gudahood kadib marka go´aan gaarista laguugu wargeliyey.

*Cabashooyin ku saabsan hab dhaqanka shaqaalaha*
Waxa kale oo aad ka caban kartaa hab dhaqanka shaqaalaha maamulka xabsiga maxalliga ah ama Waaxda Xabsiyada iyo Carbinta. Haddii aan cabashada ku saabsan dhaqanka shaqaalaha xabsiga aan lagaa qancin, ama haddii go'aanka kama dambaysta ah aan mudo 2 toddobaad gudahood laga gaarin, waxaad qaadan kartaa dacwada maxkamada.

Waxaa laga yaabaa in maxkammadu cabashadaadaada ay diido, tusaale ahaan, maxkammada inaysan arag sababta aad u cabaneyso. Laakiin maxkamadda ayaa sidoo kale diidi karta qaadista dacwada haddii, tusaale ahaan, waxaad ka cabanayso hadii ay dhaceen 4 todobbad ka hor.

*Nidaam ilaaliyaha baarlamaanka*
Kiisaska kale waxa aad geyn kartaa go´aanka nidaam-ilaaliyaha baarlamanka. Nidaam ilaaliyaha baarlamanku asagu ma bedeli karo go´aanka, laakin waxa uu weydiisan karaa agaasinka maamulka xabsiyada iyo maxaabiista inuu bal mar kale eego kiiska. Dalabyada nidaam ilaaliyaha sida jirta waa la raacaa.

*Talo bixin habka aad u dacwoon karto*
Ka dacwoodka xaaladaha xabsiga dhexe ama xabsiyada yar yar ee aad ka dacwoonayso shaqaalaha xabsiga.

Waxaa lagugu baraaru jinayaa in aad fursad u leedahay in aad ka dacwooto xaalada xabsiga dhexe ama xabsiga yar iyo in sidaas oo kale hadii laguu geeysto xadgudub iyo wixii la mida. dhinaca shaqaalaha oo aay kuu geeystaan shaqalaha xabsigu.Waxaa taa la mid ah hab dhaqanka shaqaalaha ama habka aay u dhaq mayaan,hadii aad la kulantay sida aay shaqaaluhu u dhaqmayaan iyo sida aay kuula had layaan in aay tahay mid xad gudub quursi iyo wax la mid ah .

Waxaad dacwadaada u gu gudbin kartaa shaqaalaha bashqad ama wargad xiran adigoo ka codsanaaya ,in loo gudbiyo maamulka goobta ama agaasimka xafiiska nawaaxiga,ama Madaxa ugu sareeya.markaas kadib waxaa war qadaada furaya qofka aad ku hagaajisay,ee aad u dirtay,Waxa aad ogaataa, in arinka baaritaan lagu samaayn doono ,taas oo keenaysa in la waraaysto dhinacyada aay khusaayso ama dadka dacwadani khusaayso.

**35. Sharciga warbixinta shakhsi/sharciga daatada qofka**
Marka lagu soo dhigo xabsiyada maamulka xabsiyada iyo maxaabiista,waxaa la soo ururinayaa oo laga shaqeynayaa warbixinada shakhsiyadeed ee kugu saabsan adiga iyadoo la kaashanayo ku shaqeynta daatada elektaroonikada(kumbiyuutarada). Siday sheegayaan qawaaniinta ilaalinta xogta, waxaad xaq u leedahay in:

- Xaqa baad u leedahay in lagugu wargeliyo wixi ku saabsan soo ururinta warbixinada loo isticmaalayo ku shaqynta-edb.
- Xaqa baad u leedahay inaad weydiisato nuqulka qoraalka warbixinada, laga shaqeynayo.
- Xaqa baad u leedahay inaad saxdo, tirtirto ama horjoogsato warbixinada, aan saxda aheyn, oo wax khaldaya ama qaab u muuqda in loogu isticmaalay edb-ga si liddi ku ah sharciga.

**36. Ciqaabta dishibiliinka/aadaabta iwm.**
Hadii aad ku xadgudubto sharciyda, waxa laguugu xukumi karaa ciqaab dishibiliin. Waxa kuwan ka mid ah digniin, u diidid bixitaan, booqashooyinka oo la xannibo, xanibid qorista waraaqaha ama isticmaalka taleefanka, ama ciqaab ku xirnaan qol. Waxaad leedahay xuquuq kala duwan muddada dishibiliinka. Shaqaalaha ayaa kugu wargelin doona kuwan, oo ay ku jiraan xaqa aad u leedahay inaad hadashid kahor intaan go'aan la gaarin, iyo inaad hesho sababta go´aanka. Waxa mararka qaar lagaala noqon karaa xuquuqda inaad xiriir la samayso maxaabiista kale. Fiiri sidoo kale **Cabashooyinka.**

Fiiri dacwada hoosteeda.

**37. Isticmaalka awood**
Dhacdooyinka qaar shaqaaluhu waxa ay xaq u leeyihiin inay isticmaalaan awood iyo aalado hubaal. Shaqaaluhu waxa ay tusaale isticmaali karaan qabashooyin kala duwan ama katiinadda gacmaha lagu xiro ee booliisku isticmaalo oo kale.

Nooc kasta oo isticmaal awoodeed ah waxa uu u baahan yahay kontorool aad loo hubiyey, shuruudo aad mucayan u ahna la fuliyey. Isticmaalk awooddu waa inuu ahaadaan mid aad looga taxaddaray hadba inti suurtogal ah waana inuu ahaadaa lagama maarmaan si loo gaaro ulajeedada. Fiiri dacwadda hoosteeda.

**38. Baaritaan**
Marka lagu soo dhigo xabsiga/jeelka, waa lagu baarayaa (fatashayaa). Taas macnaheedu waxa uu yahay, in shaqaaluhu ay baarayaan, bal inaad soo qaadatay alaab, aysan ahayn inaad ku heysato gudaha xabsiga/jeelka. Waa inaad iska bixisaa dhammaan dharka – xitaa haddii ay arrintani liddi ku tahay diintaada. Baaritaanka noocan ah waxa sameynaya shaqaale leh jinsiga aad leedadahy, yacin ragga waxa baaraya rag, dumarkana waxa baaraya dumar.

Waa lagu baari karaa xitaa inta aad degen tahay xabsiga, tusaale kahor iyo kadib booqashada. Amnigaaga aawadiis qolka aad degen tahay xitaa waa la baaraa.

Waxa xitaa lagugu amri karaa inaad kaadi iska qaado si loo baaro, bal inaad qaadatay maandooriye mukhaadaraad.

# Xukun iyo dhammeystir id

**39. U adeegidda bulsho**
Xaaladda qaar maxkamaddu waa go´aamin kartaa, in laguugu xukumo xukun u adeegid bulsho halki xabsi lagu dhigi lahaa. Khaas ahaan taasi waxa ay dhici kartaa, marka laguugu xukumo adigoo marqaan/sarkhaannimo gaari/baabuur ku wadaday ama dambi xatooyo.
Waad dalban kartaa u adeegitaanka bulshada, ka hor inta aanu kugu dhicin xukunku.

Haddii aad dooneyso inaad in badan ka ogaato wixi ku saabsan xukunka u adeegidda bulshada, markaas maamulka xabsiyada iyo maxaabiistu waxa uu hayaa buug yar oo ku saabsan arrinkaa. Wixi dheeraad ah weydi shaqaalaha xabsiga ama la taliyayaasha.

**40. Sii waditaanka xabbisidda?**
Marka xukun uu kugu dhaco, maxkamadda ayaa leh awoodda, ku saabsan bal in lagu sii daayo ama ay sii socto xabisidaadu, ilaa xarigaagu ka bilaabanayao.

**41. Racfaan**
Waxa jita wakhti kama dambeys oo 14 maalmood ah, laga bilaabo marka uu xukunkaagu dhacay. Waad ka dacwoon kartaa xukunka la gaaray ama inaad u sheegto shaqaalaha, leh buugga dacwada ee khaaska ah. Qareenkaaga waxa ku waajib ah inuu talo kaa siiyo adiga su´aasha ku saabsan dacwada.

**42. Xarigga lugta ee elektaroonikada ah**
Shakhsiyaadka, uu ku dhacay xukun ilaa saddex bilood ah, waxa ay fursad u heystaan in lagu xiro gurigooda (xarig lugta ee elektaroonik ah). Tani waxay ku xiran tahay xaaladdaada guryeynta iyo shaqada. Weydi talobixiyeyaalka wixi ku saabsan arrinkaa.

**43. Daweyn**
Hadday ku haysato dhibaato khamro ama daroogo, waxaad heli kartaa daawaynta balwadda muddada rumaankaaga. Xabsiyada deegaanka ayaa bixiya daawayn-horraad iyo, marka dambe, daawayn buuxda.

Haddii aad leedahay baahi khaas oo daweyn, waxa aad dhacdooyinka qaar heleysaa fursad ah in laguugu hayo meel ka baxsan maamulkaa xabsiyada iyo maxaabiista.
Haddii aan la sameyn karin, maamulka xabsiyada iyo maxaabiistu waxa uu leeyahay deeq-daweyn fara badan oo kala duwan, kuwaas oo aad u isticmaali karto, tusaale haddii aad leedahay dhibaato khalad u isticmaalid aakolo- ama mukhaadaraad/maandooriye ama laguugu xukumay rabshad amaba dambiga galmo.

Inta ugu badan deeqahan waxa aad marka ugu horeysa ka qeyb qaadan kartaa, marka uu kugu dhaco xukunkaagu. Gudaha xabsiga kuwa ku xabbisan, ee mukhaadaraad isticmaalayaasha, waxa ay ka qeyb qaadan karaan waxa la yiraahdo daaweynta howlgelinta oo ulajeedadu tahay in lagu firfircooneysiiyo si ay uga qeyb-qaataan ka daaweynta mukhaadaraadka.

Maamulka xabsiyada iyo maxaabiista waxa uu leeyahay buug yar oo ku saabsan fursadaha daweyn iwm. Weydi shaqaalaha wixi ku saabsan arrinkaa.

**44. Hadii ay tahay in laguugu hayo ciqaab xabsi**
Maamulka xabsiyada iyo maxaabiistu waxa uu sameeyey buug ka hadlaya ku heynta qof ciqaab xabsi. Buugaas waxa aad ka heli kartaa shaqaalaha.

**45. Caawimaadda baraatikada iwm.**
Marka lagugu xabbiso xabsi, waxa ku soo booqanaya xubin shaqaalaha ah 24 saacadood gudahood. Waxay kaa caawin doontaa arrimaha degdegga ah ee ku saabsan qoyskaaga, guriga, rabbaayadda, goobta shaqada, caafimaadka, iwm., waxayna kugu wargelin xeerarka iyo waxyaalaha suurtogalka ee joogitaanka xabsiga deegaanka.

Waxa sidoo kale ku soo booqan doona qof la taliye bulsho ah toddobada toddobaad ee ugu horreeya. Wuxuu kaa caawin doonaa arrimaha suurtogalka ah sida la xiriiridda dawladda hoose, codsashada ka dhaafidda lacagta rukumashada, ama caawimada lacagaha kirada.

La taliyuhu waxa uu kaa caawinayaa dhibaatoyinka baraatikada ah, tusaale la xiriiritaanka ehelada, shaqo bixiyaha iyo maamulka arrimaha bulshada.

Haddii lagu xukumo oo laguu wareejiyo in laguugu hayo xabsi, waxa howsha la wareegaya qeybta daryeelka ee hadba xabsigi laguu wareejiyey.
Haddii lagu dhigo xabsi, waxa si toos ah loogu sheegayaa qeybta diiwaan-gelinta dadka, waxa aadna weyneysaa xuquuqda kharashka arrimaha bulsho ee lagu siiyo, laakin waxa aad fursad u heysataa inaad degmada ka dalbato kaalmo kharashaad guri iwm. Talobixiyaha KiF ama xabsiga ayaa kaa caawin kara dalabka maamulka arrimaha bulshada.

**46. Waxyaabafha u khaaska ah ehelada**
Ehel ma la tahay qof la xiray, waxa markaa laga yaabaa inaad jawaab ka hesho halkan.

Shuruucda booqasho, taleefon, waraaq, bixitaan iyo waxyaabo badanba waxa lagu soo sheegay xagga sare. Hadii aad dooneysid inaad booqato qof xiran, waa inaad ka dalbataa xabsiga ogolaansho. Waana inaad xitaa dalbataa wakhti booqasho. Intaa kadib waa inaad ogaataa, inaad horey u soo qaadataa caddeyn sawir leh, marka aad booqaneyso qof ku xiran xabsiyada.

Xabsiyada xiran iyo jeelalka waa arrin ciqaab keeni karta, haddii aad heysato taleefon moobiil, marka aad booqashada ku jirto.

Haddii aad ehel la tahay qof xiran, mar walba waa laguugu soo dhowynayaa inaad la hadasho qeybta maamulka maxaabiista iyo xabsiyada ee xornimada, ee la xiriirsan jeelka.

**47. Waajibnimada dhowridda xogta.**
Dhammaan shaqaalaha xabsiyda, jeelalka iyo maamulka xabsiyada iyo maxaabiista xilliga ay xorta yihiin waxa ay leeyihiin waajibnimada dhowridda xogta.

Warbixinnada ku saabsan eedeysanaha iyo warbixinada ku saabsan xabbisanaha waa in aan loo gudbinin ehelaha ama cid kale oo aan shaqo ku laheyn. Maxaabiista oo kaliya, ayaa u sheegi kara tusaale elehada wixi ku saabsan xaaladahooda shakhsiyadeed, marka laga reebo in maxbuusku siiyo shaqaalaha ogolaansho arrinkaa ku saabsan.

**48. Talobixinta taleefon**
Haddii aad qabto su´aal, waxa aad la hadli kartaa talo bixiyaha maamulka maxaabiista iyo xabsiyada oo aad ka helysaa warbixinno ku saabsan sharciyada iyo xuquuqaha adigoo u maraya talobixin taleefon oo qarsoodi ah ee maamulka maxaabiista iyo xabsiyada oo telfoonkoodu yahay: 70 26 04 06.

- Isniinta ilaa Jimcaha: 9.00-14.00
- Fiidka Isniinta ilaa Khamiista: 19.00-21.00
- Axadaha: 12.00-16.00

Xiran Sabtiyada.

Direktoratet for Kriminalforsorgen
Strandgade 100
DK 1401 Copenhagen K

Phone 72 55 55 55
www.kriminalforsorgen.dk
dfk@kriminalforsorgen.dk